9 XAQIIQO OO KU SAABSAN GO'AAN QAADASHADA LA TAAGEERO

Xuquuqda inaad samaysato doorashooyinkaaga nolosha ayaa inta badan meesha ka saara dadka qaba naafooyinka. Go'aan Qaadashada La Taageero waxay bixisaa qaab lagu helo xorriyad badan laguna noolaado nolol aayo ka tashi leh. Waa kuwan sagaal xaqiiqo oo muujinaya sida ay u shaqayso iyo sababta ay isbeddel weyn ugu sameyso nolosha dadka.

1. WAA MAXAY GO'AAN QAADASHADA LA TAAGEERO?

Go'aan Qaadashada La Taageero waxay dadka naafooyinka qaba u oggolaataa inay sameeyaan doorashooyinka noloshooda iyagoo caawimo ka helaya dadka ay ku kalsoon yihiin, sida saaxiibada, qoyska, ama u-doodayaasha. Halki awoodda sharci lagu wareejin lahaa qof masuul ka ah, qofka ayaa haysta awoodda go'aamadiisa.

(Isha: Xarunta Kheyraadka Qaranka ee Go'aan Qaadashada La Taageero, supporteddecisionmaking.org)

2. BEDDELKA MASUUL KA NOQOSHADA NOLOSHA

Go'aan Qaadashada La Taageero waxay beddel kale oo xaddidaad yar leh u tahay masuul ka noqoshada nolosha iyo masuul ka noqoshada hantida. Taasi waxay ka dhigan tahay in qofka uu ilaashanayo xuquuqdiisa sharci iyo madax-bannaanidiisa, halki uu u gacan-galin lahaa qofkale.

(Isha: Guddiga Ururka Qareennada Mareykanka ee Xuquuqda Naafada, 2015)

3. WAXA LOOGU TALAGALAY

Go'aan Qaadashada La Taageero waxay caawin kartaa dadka qaba naafooyinka kala duwan, oo ay ku jiraan naafooyinka caqliga iyo korriinka (IDD), dhaawacyada maskaxda soo gaara, xaaladaha caafimaadka maskaxda, iyo hoos u dhaca garashada ee la xiriira da'da.

(Isha: ACLU, "Go'aan Qaadashada La Taageero: Beddelka Macquulka ah ee Masuul Ka Noqoshada Nolosha," 2018)

4. WAXA AY TAAGEERAYAASHU SAMEEYAAN

Taageerayaashu waxay dadka naafada qaba ka caawiyaan inay fahmaan xogta, gudbiyaan go'aamadooda, ayna helaan adeegyada. Ma gaaraan go'aamo, balse waxay ka caawiyaan qofka inuu naftiisa u gaaro go'aamada ugu wanaagsan.

(Isha: Golaha Qaranka ee Arrimaha Naafada, "Beddelka Masuul Ka Noqoshada Nolosha," 2018)

5. LABO DOORASHO: MID RASMI AH IYO MID AAN RASMI AHAYN

Go'aan Qaadashada La Taageero waxay noqon kartaa mid aan rasmi ahayn iyadoo la adeegsanayo shabakad shakhsiyeed oo ka kooban saaxiibo iyo qoys la isku halleyn karo. Ama waxay noqon kartaa mid rasmi ah, oo leh heshiis qoran oo sharci ahaan la aqoonsan yahay. Heshiisyada rasmiga ah waa ay kala duwan yihiin gobol kasta.

(Isha: Maamulka Nolosha Bulshada, Xaashida Xaqiiqada SDM)

6. NATIIJOOYIN WANAAGSAN

Cilmi baaristu waxay muujinaysaa in dadka isticmaalaya Go'aan Qaadashada La Taageero ay soo sheegeen aayo ka tashi wanaagsan, nolol tayo sare leh, iyo fayo-qab guud oo ka wanaagsan kuwa ku hoos jira masuul ka noqoshada nolosha. Iyo waxaas oo dhan oo leh hoos u dhac wayn oo ah xagga waxyeellada, xadgudubka, ama ka faa'iidaysiga.

(Isha: Shogren iyo kuwa kale, "Go'aan Qaadashada La Taageero," Joornaalka U-wada-Dhannaanshaha, AAIDD, 2017)

7. AQOONSIGA SHARCI OO SII KORDHAYA

Laga bilaabo 2024, in ka badan 20 gobol oo Mareykanka ah ayaa meelmariyay xoogaa nooc sharci ama aqoonsi rasmi ah oo ku aadan Go'aan Qaadashada La Taageero. Tiradaasina waa ay sii kordhaysaa.

(Isha: U-doodayaasha Xuquuqda Dadka Naafada ah; Raadraacaha Sharciga Gobolka ee NRCSDM)

8. KU QOTOMA XUQUUQDA AADANAHA EE CAALAMIGA AH

Go'aan Qaadashada La Taageero waxay ku salaysan tahay Cahdiga Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Naafada (CRPD). Qodobka 12 ee Cahdiga wuxuu sheegayaa in dadka qaba naafooyinka ay leeyihiin xuquuq ay ku gaaraan go'aamo sharci ah oo la mid ah qofkasta oo kale.

(Isha: Qaramada Midoobay, CRPD Qodobka 12, 2006)

9. WAXA LOOGU TALAGALAY

Go'aan Qaadashada La Taageero waxaa taageeray ururada hormuudka u ah naafada wadanka oo dhan, oo ay ku jiraan The Arc, Ururka Mareykanka ee Naafooyinka Caqliga iyo Korriinka (AAIDD), Shabakadda Isu-dooddidda Dadka qaba Ootisamka (ASAN), iyo Shabakadda Qaranka ee Xuquuqda Naafada.

(Isha: Bayaanka Wadajirka ah ee Go'aan Qaadashada La Taageero, The Arc & AAIDD, 2012, la cusboonaysiiyay)

Waxbadan ka ogow halkan ama booqo
TreatPeopleLikePeople.org